THE EDUCATION STATE | VICTORIA State Government | Department of Education

**Somali | Soomaali**

# Iska-diiwaangelinta dugsiga hoose sanadka 2026



Bilowga iskuulka waa wakhti xiiso u leh carruurta, waalidiinta iyo daryeelayaasha. Waxaan rabnaa inaan ku caawino si nidaamka diiwaangelinta uu kuugu noqdo mid aad u sahlan.

Victoria gudaheeda, ilmahaagu waxa uu xaq u leeyahay in uu dhigto dugsiga loo qoondeeyey ee xaafada ('dugsiga xaafaddaada') sida uu qabo *Sharciga Dib-u-habaynta Waxbarashada iyo Tababarka 2006 (Education and Training Reform Act 2006)*.

Waxa kale oo aad boos ka codsan kartaa dugsi aan ahayn dugsiga ku yaal xaafadaada. Dugsigu wuxuu tixgelin doonaa codsigaaga sida waafaqsan sharciga meelaynta. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan Sharciga Meelaynta, booqo bogga iska-diiwaangelinta dugsiga.

## Jadwal cusub oo gobolka oo dhan ah ee Aasaaska (Prep)

Sannadka koowaad ee dugsiga hoose waxa loo yaqaan Foundation ama Prep. Waxaan soo saarnay Jadwalka isdiiwaangelinta aasaasiga ah ee loogu talagalay dhammaan dugsiyada hoose ee dawladda Victoria inay ku dhaqmaan (eeg bogga 4aad). Jadwalku wuxuu hiigsanayaa inuu kaa caawiyo sidii aad ku fahmi lahayd goorta iyo sida aad ilmahaaga uga diiwaangelin karto Aasaaska sannad dugsiyeedka 2026.

## Goorma ayay tahay in aan ilmahayga u diiwaangeliyo sannadka ugu horreeya ee dugsiga hoose?

Ilmahaagu waa inuu jiraa 5 jir ugu dambayn 30-ka Abriil sanadka uu bilaabayo dugsiga.

Waxbarashadu waa ku qasab carruurta 6 sano jirsatay.

Si aad ilmahaaga uga diiwaan geliso dugsiga hoose ee dawladda Victoria sannad dugsiyeedka 2026, u soo gudbi dugsiga codsiga diiwaangelinta 25-ka Luulyo 2025.

## Sidee uga diwaan galin karaa ilmahayga sanadka ugu horeeya ee dugsiga hoose?

Tallaabooyinkan qaad si aad sannadka ugu horreeya ee dugsiga hoose u diwaangeliso ilmahaaga:

1. Ka hel dugsiga ku yaal xaafadaada website ka Find my School (hoos eeg).
2. La xidhiidh dugsiga hoose ee dawladda si aad u sameysato ballan aad kusoo kormeerto dugsiga ama si aad wax badan uga ogaato dugsiga iyo nidaamka loo maro diiwaangelinta.
3. Soo dejiso xirmada macluumaadka diiwaangelinta Aasaaska (U diyaargarowga) ee Iska-diiwaangelinta Aasaaska (U diyaargarowga). Xidhmada waxaa la heli doonaa Talaadada 22-ka Abriil 2025 waxaana qeyb ka ah foomka codsiga. Dugsiga waxa kale oo laga yaabaa inuu ku siiyo nuqul foomka ah si aad usoo buuxiso.
4. Soo gudbi arjiga isdiiwaangelinta ee Aasaaska (Foundation ka) **ugu dambayn Jimcaha 25-ka Luulyo 2025**.
5. Natiijada codsigaga waxaa laguu soo sheegi doonaa **inta u dhaxaysa Isniinta 28-ka Luulyo iyo Jimcaha 8-da Agoosto 2025**. Haddii la aqbalo arjigaaga, waa inaad aqbashaa aqbalaadaas **ugu dambayn Jimcaha 22-ka Agoosto 2025**.

6. Ka qayb qaado kulamada lagu bixinayo macluumaadka isdiiwaangalinta iyo fadhiyada kala guurka **inta lagu jiro Teramka 4-aad 2025**.
7. Ilmahaagu waxa uu bilaabayaa Aasaaska (Foundation ka) **laga bilaabo Arbacada 28-ka Janaayo 2026**.

## Sideen ku heli karaa dugsiga ku yaal xaafadeyda?

Ka hel dugsiga dugsiga xaafadaada ku yaal bogga Find my School adoo raacaya tillaabooyinka hoose:

1. Geli findmyschool.vic.gov.au browser kaaga.
2. Geli address ka aad degan tahay meesha hoose ee ay ku qoran tahay ‘Enter your address to get started’.
3. Ka dooro sanadka 2026 meesha ay ku qoran tahay ‘Enrolment year’. **Mid ogoow:** Xaafadaha ay ku kala yaalaan iskuulaadka sanadka 2026 waxa la heli doonaa dabayaaqada Teeramka 1-aad, ee 2025.
4. Ka dooro Primary meesha ay ku qoran tahay ‘School type’.

Khariidadda ayaa markaas kabacdi ku tusi doonta addresskaaga, dugsiga ku yaal xaafadaada, dhanka bidixdana waxaa ku yaal siyaabaha aad kula xiriiri karto dugsiga. Haddii aad hoos u dhaadhacdo, waxay sidoo kale ku tusi doontaa shanta dugsi ee ugu dhow addresskaaga.

Waxaad sidoo kale ku raadin kartaa magaca dugsiga meesha ay ku qoran tahay 'Search for school'.

## Ilmahaygu ma codsan karaa dugsi hoose oo dawladeed oo aan ahayn dugsiga xaafadeyda ku yaal?

Haa, waxaad codsan kartaa dugsiyo aan ahayn dugsiga xaafadaada ku yaal. Dugsigu wuxuu u tixgelin doonaa codsigaaga si waafaqsan sharciga meelaynta iyo booska bannaan. Macluumaadka ku saabsan sida codsiyada loo kala horraysiiyo waxaad ka heli kartaa bogga Iska diiwaangelinta dugsiga.

## Maxaa dhacaya haddii aan helo warqad ay ku qoran tahay in codsigayga diiwaangelinta aan la aqbalin?

Waa inaad dalbataa inaad ilmahaaga ka diiwaangeliso dugsi kale. Ilmahaaga waxa loo dammaanad qaaday in uu boos ka heli doono dugsiga xaafadaada ku yaal. Dugsiga xaafadaada ee uu ilmahaagu tagayo waxaa lagu go'aamiyaa iyadoo lagu salaynayo cinwaanka aad caadiyan ku nooshahay. Booqo Ii hel iskuulkayga (Find my School) si aad ilmahaaga ugu heshid dugsiga xaafadaada. Bogga Iska-diiwaangelinta dugsiga ayaa sidoo kale kaa caawin kara inaad xaqiijiso address ka ilmahaaga si aad u diiwaangeliso.

Waxaad sidoo kale racfaan ka qaadan kartaa go'aanka. Bogga Iska-diiwaangelinta Aasaaska (Prep) ayaad ka heli kartaa macluumaad ku saabsan habka racfaan looga qaato natiijada codsiga diiwaangelinta.

## Maxaa dhacaya haddii aan seego waqtiyada diiwaangelinta?

Waxaad codsan kartaa inaad ilmahaaga ka diwaangeliso Aasaaska (Foundation) sannad dugsiyeedka 2026 wakhti kasta laga bilaabo Teeramka 2-aad, 2025.

In kastoo la rabo inaad soo gudbiso arjiga isdiiwaangelinta ugu dambayn Jimcaha 25-ka Luulyo 2025, codsiyada wali waa laga aqbali doonaa qoysaska aanan codsiyadooda kusoo gudbin waqtigii diiwaangelinta, kuwa ka guura meelaha ay degan yihiin ama kuwa dhawaan yimid Victoria.

Codsiyada diiwaangelinta ee la soo gudbiyo wixii ka dambeeya 25-ka Luulyo 2025 iskuulka ayaa si waafaqsan Xeerka Meelaynta ee waaxda u eegi doona codsiyadaas marka ay qabtaan.

## Halkeen ka heli karaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan diiwaangelinta dugsiga hoose?

Waxaad waydiisan kartaa dugsiga hoose ee xaafadaada ku yaal macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan nidaamka diiwaangelinta Aasaaska.

Bilawga Teeramka 2-aad, 2025 waxa kale oo aad ka heli kartaa xidhmo macluumaad ah oo ku saabsan nidaamka diiwaangelinta Aasaaska bogga Iska-diiwangelinta Aasaaska (Prep).

Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo fasiraada xidhmada macluumaadka, fadlan kala hadal dugsiga hoose ee xaafadaada si aad u hesho caawimo.

## Yaan kala xiriiri karaa wixii caawimaad ah?

Isu-duwaha Kala-guurka (The Transition Coordinator), Howlwadeenka Diiwaangelinta ama maamulaha dugsiga hoose ee aad rabto inaad codsato ayaa kaa caawin kara su'aalo kasta oo aad ka qabtid habka diiwaangelinta.

## Xiriirada (links) muhiimka ah

Fadlan hoos ka hel xiriiro (links) muhiim ah oo adiga ku caawin kara marka ilmahaagu bilaabayo dugsiga hoose:

Ii hel Iskuulkayga (Find my School) – findmyschool.vic.gov.au

Macluumaadka aagagga dugsiga – vic.gov.au/school-zones

Isdiiwaangelinta Aasaaska (Prep) – vic.gov.au/enrolling-foundation-prep

Diiwaangelinta dugsiga – vic.gov.au/how-choose-school-and-enrol

Naafada iyo waxbarashada loo dhan yahay – vic.gov.au/disability-and-inclusive-education

Xiriirada xafiiska gobolka – vic.gov.au/office-locations-department-education

# Jadwalka waqtiga 2025 ilaa 2026

| Taariikhaha 2025 | Hawsha |
|---|---|
| **Teeramka 2-aad: Talaado 22-ka Abriil 2025 ilaa Jimcaha 4-ta Luulyo 2025** | |
| **Teeramyada 1-aad iyo 2-aad, 2025** | Dugsiyada hoose waxay qabtaan socdaalo tusmo ah, fadhiyo macluumaad iyo hawlo kale oo loogu talagalay qoysaska ilmahooda u doonaya iska-diiwaangelinta Aasaaska (Prep) 2026. |
| **Bilowga Teeramka 2-aad, 2025** | Aagagga dugsiga ee sannad dugsiyeedka 2026 waxay si toos ah uga socdaan findmyschool.vic.gov.au<br>Waalidiinta iyo daryeelayaashu waa inay tagaan findmyschool.vic.gov.au si ay u helaan dugsiga loo qorsheeyay xaafada (dugsiga deegaanka) 2026.<br>Xirmada Macluumaadka Diiwaangelinta ee Waalidiinta iyo Daryeelayaasha ayaa diyaar u ah in laga soo dejiyo Iska-diiwaangelinta Aasaaska (Prep). |
| **Laga bilaabo isbuuca 1-aad, ee Teeramka 2-aad 2025** | Dugsiyada hoose waxaa laga yaabaa inay Xirmooyinka Macluumaadka Diiwaangelinta u qeybiyaan qoysaska mustaqbalka laga yaabo inay ilmahooda ka diiwaangeliyaan iyo bulshada ku nool xaafada. |
| **Laga bilaabo isbuuca 1-aad, ee Teeramka 2-aad 2025** | **Codsiyada diiwaangelinta ayaa furmaya** – Waalidiinta iyo daryeelayaashu waxay soo gudbinayaan codsigooda diiwaan gelinta dugsiga hoose ee dawladda wixii ka bilowdo taariikhdan. |
| **Teeramka 3-aad: Isniin 21-ka Luulyo 2025 ilaa Jimcaha 19-ka Sebtembar 2025** | |
| **Ilaa Jimcaha 25-ka Luulyo 2025** | **Codsiyada is-diiwaangelinta marka la soo gudbinayo** – Waalidiinta iyo daryeelayaasha waxay soo gudbinayaan codsigooda diiwaan gelinta dugsiga hoose ee dawladda taariikhdan. |
| **Inta u dhaxaysa Isniinta 28-ka Luulyo iyo Jimcaha 8-da Ogosto 2025** | Dugsiyada hoose waxay qaab qoraal ahaan ah ku ogeysiiyaan waalidiinta iyo daryeelayaasha natiijooyinka diiwaangelinta Aasaaska (Prep), sida ku cad Sharciga Meelaynta ee waaxda. Tan waxa ku jiri kara warqad sheegaysa in codsigaaga la aqbalay, warqad xaqiijinaysa diiwaangelinta, ama warqad sheegaysa in codsigaagii la diiday.<br>Waalidiinta iyo daryeelayaasha loo diray warqad lagu diidayo codsigoodii waxay bilaabi karaan inay qaab qoraal ah racfaan ugu gudbiyaan dugsiga hoose. |
| **Ilaa Jimcaha 22-ka Agosto 2025** | Waalidiinta iyo daryeelayaasha loo diray warqad lagu cadeynayo in la aqbalay waa inay ayagana kusoo sheegaan taakhdan inay aqbaleen inay ilmahooda ka diiwangelinayaan dugsiga. |
| **Ilaa Jimcaha 22-ka Agosto 2025** | **Taariikhda xiritaanka** waalidiinta iyo daryeelayaasha si ay qaab qoraal ah ugu soo gudbiyaan dugsiga hoose racfaan. |
| **Ilaa Jimcaha 5-ta Sebtembar 2025** | Dugsiyada hoose waxay taariikhdan qaab qoraal ah ku ogeysiin doonaan dhammaan waalidiinta iyo daryeelayaasha, natiijada rafcaankooda. |
| **Ilaa Jimcaha 19-ka Sebtembar 2025** | **Taariikhda xidhitaanka** waalidiinta iyo daryeelayaasha si ay ugu soo gudbiyaan rafcaan qoraal ah Agaasimaha Gobolka ee ay khusayso, haddii ay ku guuldareysteen racfaankii ay u gudbiyeen dugsiga hoose. |
| **Teeramka 4-aad: Isniin 6-da Oktoobar 2025 ilaa Jimcaha 19-ka Diseembar 2025** | |
| **Inta lagu jiro teeramka 4-aad, 2025** | Dugsiyada hoose waxay qabtaan kalfadhiyo xilliga kala guurka ah. |
| **Ilaa Jimcaha 31-ka Oktoobar 2025** | Tuulooyinka waxay taariikhdan qaab qoraal ku ogeysiin doonaan dhammaan waalidiinta iyo daryeelayaasha natiijada rafcaannada ee kasoo baxay Agaasimaha Gobolka. Tani waxay khusaysaa kaliya rafcaannada la helo taariikhda xidhitaanka ee Jimcaha 19-ka Sebtembar 2025. |